

MIYEEY HABOON TAHAY IN AAD ILMAHAAGA KAGA TAGTO GURIGA KALIGIIS?

Ma jirto jawaab dhib yar, hase ahaatee xasuusnow...

Waalidiinta ama hayayaasha caruurta sharci ahaan ayey u xilsaaran yihiin in:

- *Indhaha ku hayaan oo ay kantaroolaan caruurtooda.*
- *In ay caruurtooda siiyaan baahiyaha aasaasiga ah ee noloshaha, oo ay ku jirto: cunto, hoy, dhar, daryeel caafimaad iyo ka gacansiinta sharci marka loo baahdo.*
- *Caruur badan ayaan gaadhsiisnayn heer waxgarad oo guriga ay ku joogaan kaligood ilaa ugu yaraan ay gaadhayaan 12 sano jir. Talo da'eed gaar ah oo laga talo bixin karaa ma jirto waayo waxay ku xidhan tahay shakhsiyadda ilmaha. Qaar toban sano jir ah ayaa aad u masuul ah oo joogi kara guriga wakhti yar dugsiga ka dib inta uu waalidku soo hooyanayo. Laakiin, waxa jira dhowr iyo toban jiro oo aan waligood lagu aamini karayn in ay guriga kaligood joogaan.*
- *Xataa haddii uu ilmahaagu muujiyo astaamaha waxgaradka, ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay ILMANIMO waana in lagu tuurin ama lagu riixin aduunka ama arlada dhan ee xilalka iyo mashaakilka waayeelka wakhtigooda ka hor. Ilma kastaa waa in maalin walba wakhti haystaa si ula wakhti qaato caruur lana siiyo wakhti aan la daryeelayn. Waa in ay ka qayb geli karaan ciyaaraha, casharo muusiko ah, naadiyo gaar daneed ah, ama in ay ciyaaraan uun.*

Halkan waxa ku yaala su'aalo ay tahay in la tixgeliyo inta aadan u ogolaan ilmahaaga in uu guriga kaligii joogo:

- *Ilmahaaga miyuu nidaamka ama hab-dhaqanka guriga raacaa marka aanad halkaa joogin?*
- *Miyey tani culeys xad dhaaf ah ku tahay ilmaha?*
- *Ilmahaagu ma kaligii ma isdiraa si uu haystaa waxayaabo ku dardargelinaya in uu wax u akhristo oo u dhameeyo shaqo-guriga loo soo direy iyadoo aan cidii ilaalinaynin ama indhaha ku hayn?*
- *Sidee buu ilmahaagu u dhaqmaa marka uu dareemo culays/murugo?*
- *Miyuu ilmahaagu kari doonaa in uu muujiyo deganaan marka xaalado degdega ah lagu jiro?*
- *Miyuu ilmahaagu naftiisa/nafteeda u diyaarin karaa/kartaa cunto fudud ama cunto caafimaad leh?*

War-galintan ku socota waalidka waxay si niyad samid leh uga timid Qaybta Isgaadhsiinta Adeegyada Caruurta ee (Franklin County Children Services' Communications Division).
24ka saacadood layn u furan xad gudubka caruurta: 614-229-7000
childrenservices.franklincountyohio.gov.



Protecting Children by Strengthening Families